

Isoniazid (INH)

Somali



Buugga tilmaamaha dawooyinka (TB da)

Waa maxay INH?

Isoniazid (INH) waa dawo antibiotik ah ee lagu daweeyo cudurka qaaxada (TB). Laba siyaalod ayaa loo isticmaalaa:

1. In lagu dilo jeermiga hurda ee TB da
2. In lagu dilo jeermiga TB da ee cudurka keena (marka lala qaato dawooyin kale)

Jeermiga TB da waa mid dhib badan sida loo daweeyana adagtahay. Waa in aad qaadataa dawadan mudo lix ilaa laba iyo toban billood ah si loo cirib tiro jeermiga TB da. Takhtarkaada ayaa go'aaminaayo inta billod aad qaadanaysid dawada.

Sidee baan u qaataa dawadan?

- Waa muhim in aad maalin kasta qaadatid dawada **ama** sida uu takhtarkaada ku faray
- **Isla markiiba ogeysii takhtarkaada marka aad joojiso qaadashada dawada**
- Hadii aad ilowdo qaadashada qeyb dawo ah, qaado sida ugu dhaqsiiyaha badan adigoona marna laba qeyb isku qaadan hal mar
- La socodsii takhtarkaada dawooyinka kale ee aad qaadatid ama kuwa aad hadda bilowday
- Isku day in aad qaadato dawada adoo gaajoon. Hadii ay kaa dhibto calooshana ku qaado cunto
- Ku keydi dawada INH da meel qabow oo qalalan

HA CABIN QAMRO inta aad qaadanaysid dawadan. Waxaad dhaawici kartaa beerkaad.

Maxaan uga baahanahay in aan qaato fitamiinka B₆ (Pyridoxine) isla markaas?

Fitamiinka B₆ wuxuu ka hortagayaa kabaabyada iyo jiri-ricada faraha gacmahaada iyo lugahada ba, tasoo ay keento INH ka. Waxaa laga yaabaa in aad ka maaranto fitamiinka hadii aad qaadatid cunto nafaqo fiican leh.

Waa kuwee calaamooyinka aan iska jiraayo?

- Dadka sida ay u badanyihiin, dawadan INH ka ma dhibto
- Waxaad u baahantahay in uu takhtarkaadu si joogta ah kuula socdo inta aad qaadanaysid dawada INH ka
- **Calaamadaha caadi ga ah ee leysku arko waxaa ka mid ah:**
 - Nabro yar yar oo jirka ka soo yaaca
 - Raashiin xumo
- **Hadii aad isku aragtid calaamadahan qaarkood ee qatarta ah, jooji dawada takhtarkana la xiriir**
 - Labbo labbo/ matag
 - Calool maroojis/xanuun
 - Caajis/ daal fara badan
 - Kaadi aad u calawsan
 - Kabaabyo ama xanuun faraha gacmaha iyo lugaha
 - Jirka ama indhaha oo huruud noqda
 - Saddex cisho ama ka badan oo qandho ah

Habka dawada TB da loo qaato

- Qaado dawada waqti go'an maalin kasta, sida:
 - Inta aadan jiifsan
 - Marka ugu horeeysa ee aad hurdada ka kacdid
- Isticmaal gasaca lagu qeybiyo dawada oo todobaadle ah.
- Maalin kasta ee aad qaadatid kaniiniga ku calaamadey buuga jadwalka taariikhda
- Weydiiso qof qoyska ka mid ah ama saaxibkaa in uu ku xasuusiyo
- Tix gelin sii in aad raacdo barnaamijka Hubinta Qaadashada Dawada (DOT)

Hadii aad wax su'aal ah ka qabtid dawooyinkaada ama TB da fadhlan la xiriir takhtarkaada ama Toronto Public Health oo laga helo **416-338-7600**

E-mail: targettb@toronto.ca

Web Site: www.toronto.ca/health/tb_prevention

